



## Paxlovid

### S: Waa maxay Paxlovid?

Paxlovid waa daawo loogu talagalay daawaynta cudurka COVID-19 ee fudud-ilaadhexdhexaad. Maamulka Cuntada iyo Daawooyinka ee Mareykanka (FDA) ayaa u ansixiyey in la isticmaalo Diiseembar 2021. Paxlovid waxa loo isticmaalaa in lagu daaweeyo caabuqa COVID-19, ee mahan in looga hortago.

### S: Yaa loogu talagalay Paxlovid?

Paxlovid waxaa loogu talagalay carruurta da'dooda ay ka weyn tahay 12 sano jir kuwaas oo miisaankoodu yahay ugu yaraan 88 rodol. (40 kiilo) iyo dadka waaweyn ee khatarta sare ugu jira caabuqa COVID-19 ee daran oo baaritaankooda COVID-19 noqday mid togan. Tan waxaa ka mid ah dadka da'dooda ay ka weyn tahay 65 sano ama qaba xaalado sida kansarka, cudurada wadnaha, xaaladaha sambabada mudada dheer, ama sokorowga.

Dadka qaba cudurada beerka ee daran, cudurada keliyaha, ama xasaasiyad ku qaba mid ka mid ah maadooyinka daawada lagu daray waa in aysan qaadanin Paxlovid. Dadka qaba caabuqa HIV-ga ee sida liidata loo xakameeyo waa inay la tashtaan bixiyehooda daryeel caafimaad ka hor inta aysan qaadan Paxlovid.

### S: Sidee ayaa la isugu qoraa Paxlovid?

Paxlovid waxaa laga qaataa afka. Garoojada caadiga ah waa saddex kiniini laba jeer maalintii muda ilaa shan maalmood ah. Waa muhiim in la dhammeystirto koorsada daaweynta ee 5-ta maalmood ee buuxda oona la sii waddo isgo'doominta marka loo eego tallooyinka caafimaadka dadweynaha. Waa inaan la qaadanin Paxlovid wax ka badan 5 maalmood.

### S: Miyaa hadda la heli kara Paxlovid?

Haa. Laakiin marka hore agabka aad ayuu u koobnaan doonaa. Bilowgii, waxaa loo adeegsan doonaa kuwa khatarta ugu sareysa ku jira. Inta agabyada ay ka soo kordhaayaan, waxay noqon doontaa mid si ballaaran loo heli karo.

Wixii macluumaad dheeraad ah, akhri [hagaha macluumaadka bukaanka](#).

**Helitaanka dukumiintiga:** Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. La xiriiir Xarunta Warbixinta Caafimaadka ee 1-971-673-2411, 711 TTY ama [COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us](mailto:COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us).